



# Naga caawi inaanu abuurno qorshe-khariidadeedka PPS adigoo buuxinaya xogururintan

Iyadoo Dugsiyada Dadweynaha Portland ay sii wadaan ka shaqaynta abuurista qorshe-khariidadeed dhammaystiran oo loogu talogalay waxbarashada farshaxanka ee degmada oo dhan, aragtidaada ayaannu u baahannahay!

Waa maxay waxa aad qimaha u badan siisaa waxbarashada farshaxanka? Waaxda Farshaxanka Muuqaalka iyo Masraxa (VAPA) waxay qabanaysaa xogururin si ay faham uga qaadato waxa ardayda, qoysaska, xubnaha bulshada, saaxiibada farshaxanka iyo shaqaaluhu rabaan in mudnaan gaar ah la siiyo abuurista [Qorshaha Waxbarashada Aqoonta Farshaxanka](#) (MAEP).

## Halkan dhagsii si aad u buuxiso xogururinta

Xogururinta waxa abuuray kooxda VAPA: Kristen Brayson, Carolyn Drake iyo Laura Arthur. Xogururintu waxay ka qayb tahay dadaalka kaqaybgalinta VAPA ee ka socda degmada oo dhan iyo bulshada sanadka iyadoo xubnuhu sii wadaan qaabaynta MAEP-ga. Kooxdu waxay la tashi la sameeyeen ardayda dugsiga sare ee ka socda meel kasta oo degmada ka tirsan, kuwaasi oo gacan ka gaystay qaabaynta qaabka xogururinta kana dhigay erayada su'aaluhu ka kooban yihiin qaar soo-jiidasho leh.

Wakhtigan lagu jiro, iyadoo ku xiran halka ardaydu deggan yihiin ee ay dugsiga ka dhigtaan, waayo-aragnimadooda farshaxanku waxa dhici karta inuu ka duwanaado waayo-aragnimada filkooda ee degmada oo dhan. MAEP waxay gacan ka gaysan doontaa wax-ka-qabashada sinnaan la'aanta nidaamkeena ka jira waxayna siin doontaa qorshe istaraatijiyadeed fulinta isbaddalka baaxadda wayn leh.

MAEP waxay ku dhisan tahay fursadaha ay suurtogalisay Cashuurta Farshaxanka Portland, taasi oo lagu fuliyey afti la qaaday 2012. PPS waxa laga rabaa inay isticmaasho lacagta cashuurta si ay ugu bixisho kharashka macallimiin muctarif ah oo u dhiga farshaxanka muuqaalka iyo masraxa ardayda barbaarininta ilaa fasalka shanaad kujirta. Dakhliga ka soo xerooda cashuurtu wuxuu u saamaxay PPS inay ka korto 15 macallin oo labada gallin u dhiga farshaxanka ardayda K-5 wuxuuna gaaray 63 macallin oo wax u dhiga arday gaaraysa 21,738 oo ka tiran dhammaan dugsiyada hoose.

MAEP waxay raadin doonaa inay u abuurto dariiq koox kasta oo dugsiyo ah (nidaamyada isku tiirsan kaasi ardayda dugsiga hoose dhammaystaa u gudbaan dugsiga dhexe iyo dugsiga sare ee meesha ay dugsiga ka dhigteen). Dariiqyada koox kasta waxa loogu talogalay inay ka mid ahaadaan dariiqyo K-5 ah oo fara badan oo lagu baranayo jaaska, muusiga, tiyaatarka iyo farshaxanka muuqaalka – iyadoo yoolku yahay ardayda oo dhan inay helaan waxbaris aan kala go' lahayn oo dhawr qaybood oo farshaxanka ah laga bilaabo laga bilaabo dugsiga hoose ilaa dugsiga sare.

Marka ay dhammaato, MAEP waxay seeska u taago dariiqoyo dhammaystiran oo ah K-12 kaasi o ardaydu ay qaadan doonaan waxbarasho farshaxan oo adag, macne leh, oo loo siman yahay.

Wax badan kaga ogow farshaxanka PPS halkan [www.ppsarts.com](http://www.ppsarts.com).